

Soo saarista iyo iibinta badeecad la baakadeeyay oo hilib ku jira Minnesota

Xeerarka Tafaariiqda iyo Jumlada

Warshadaha cuntada, kanaalada tafaariiqda waxay si toos ah ugu iibiyaan badeecadaha macaamiisha iyada oo loo marayo dukaamada, madalaha internetka, ama suuqyada beeralayda. Kanaalada jumlada waxay ku iibiyaan tiro badan ganacsiyada sida makhaayadaha, hay'adaha, ama tafaariiqleyda, kuwaas oo dib u iibiya ama isticmaala badeecadaha. Badeecooyinka hilibka ku jira waxaa lagu xakameeyaa iyadoo ku xiran kanaalka iibka ee farsameeyaha. Shatiga tafaariiqda wuxuu oggolaanayaa iibinta tooska ah ee macaamiisha ugu dambaysa iyo qaar ka mid ah iibka hay'adaha (ilaa 25% iibka guud) iyadoo aan loo baahnayn kormeer joogto ah.^{1,2} Wax soo saarka jumlada ee badeecooyinka hilibka ku jira ee leh in ka badan 2% hilib miisaan ahaan qaabaynta waxay u baahan tahay kormeer Waaxda Beeraha ee Minnesota (MDA) ama Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA) oo leh kormeero adag, joogto ah iyo shati. Kormeer joogto ah wuxuu ka dhigan yahay in habka ganacsiga la kormeero maalin kasta inta lagu jiro hawlgalka si loo hubiyo in la soo saarayo cunto ammaan ah. Iibinta qaybinta jumlada waxay sidoo kale u baahan doontaa Shatiga Soo-saarka Cuntada Jumlada ee MDA.³

Magaalooyinka qaarkood waxay sidoo kale yeelan karaan shatiyo gaar ah ama xaddidaadyo dheeraad ah oo ku saabsan hawlgallada cuntada ee tafaariiqda ama jumlada. Had iyo jeer la tasho xeerarka magaalada si loo hubiyo u hoggaansanaanta. Minneapolis waxay bixisaa shatiga Micro-Food Wholesaler, kaas oo oggolaanaya iib jumlo aad u xaddidan oo loo sameeyo tafaariiqleyda kale ee ku dhex jira xuduudaha magaalada oo keliya, iyadoo aan loo baahnayn kormeer joogto ah.⁴

“La mid ah” marka loo eego kormeerka USDA

Minnesota waa mid ka mid ah 29 gobol oo hadda ka shaqeeya Barnaamijka Kormeerka Hilibka iyo Digaagga (MPIP), oo loo arko ugu yaraan inuu la mid yahay barnaamijka federaalka ee kormeerka hilibka iyo digaagga. Tani waxay ka dhigan tahay in barnaamijka kormeerka gobolka “Equal To” (E2) uu buuxiyo heerarka USDA laakiin soo saarayaashu ay kaliya ku iibin karaan, qaybin karaan, oo jumlo ku siin karaan hay'ado kale oo ku yaal gobolka Minnesota. Kormeerka federaalka USDA ayaa loo baahan yahay si loogu iibiyo gobollada kala duwan. ^{1,5} Doorashada midkood waxay ku xiran tahay cabbirka ganacsiga, dabacsanaanta jadwalka, suuqyada la beegsanayo iyo waxyaabo kale. Qodobbada waxaa lagu soo koobay Jadwalka 1.

**JADWALKA 1: ISBARBAR DHIGGA “EQUAL TO” EE MINNESOTA
KORMEERKA HILIBKA IYO KORMEERKA JOOGTO AH EE USDA**

QOBOB*	BARNAAMIJKA “EQUAL TO”	KORMEERKA JOOGTO AH EE USDA
Awoodda sharci	lib gudaha gobolka oo keliya	lib guud ahaan dalka
Kormeer	Hay'adda gobolka, kormeerka USDA	Adeegga Badbaadada Cuntada iyo Kormeerka USDA (FSIS)
Joogitaanka kormeeraha	Dabacsanaan badan	Wajib ah inta hawlgalka oo dhan
Taageero	Caawimaad farsamo oo dhow	Mid aan si gaar ah loo habeyn
Ku habboon	Ganacsiyada maxalliga ah/degmooyinka	Ganacsiyada leh hamiga qaranka

* Kharashka laguma darin qodob isbarbardhigga. Kormeerka laftiisa ma aha kharash toos ah oo ganacsiga ah; beddelkeedi, waa adeeg ay maalgeliso gobolka ama federaalka. Hase yeeshee, ganacsiyadu waxay qaadi doonaan kharash dheeraad ah haddii kormeerku loo baahdo maalinta fasaxa ama saacadaha shaqada caadiga ah ka baxsan. Intaa waxaa dheer, miis ama goob xafiis waa in ganacsigu siiyo kormeeraha, taas oo noqon karta kharash dhisme oo dheeraad ah.⁵

Shuruudaha Qorshaha Badbaadada Cuntada

Qorshaha Falanqaynta Khataraha iyo Qodobada Xakamaynta Muhiimka ah (HACCP) ayaa loo baahan yahay hawlgallada hilibka jumlada. Tani waxay hubisaa in khataraha badbaadada cuntada la aqoonsado oo la xakameeyo inta lagu jiro wax-soo-saarka. HACCP (loo akhriyo "hass-sup") waa nidaam maamul oo badbaadada cuntada lagu xakameeyo iyadoo la falanqeeyo lana xakameeyo khataraha noolaha, kiimikada, iyo jireed laga bilaabo wax-soo-saarka alaabta ceeriin, iibsiga iyo maaraynta, ilaa soo saarista, qaybinta, iyo cunista badeecadda la dhammeeyay. Tababarka iyo shahaado-siinta.^{7,8,9,10} HACCP waxaa lagu dhammaystiri karaa si toos ah (Jaamacadda Minnesota Extension mararka qaarkood waxay bixisaa koorsooyin) ama online (tusaale ahaan, ehaccp.org).

Shuruudaha Goobta

Si loo ansixiyo habaynta hilibka, goobaha waa inay buuxiyaan heerar gaar ah oo dhisme, nadaafad, iyo hawlgal ah. Tani waxay ku jirtaa qaboojin sax ah, qalab, xakamaynta cayayaanka, iyo qorshayaasha nadaafadda.¹¹ Soo saarista badeecooyinka hilibka ku jira goob wadaag ah (jiko ganacsi oo la wadaago)¹² waa suurtagal, laakiin waxay keenaysaa caqabado dheeraad ah, sida jadwalka, khataraha wasakhda isdhaafsi, iyo buuxinta joogtada ah ee dhammaan shuruudaha kormeerka. Guud ahaan, soo saaraha wuxuu u baahan doonaa inuu muujiyo in badeecaddiisa lagu kala sooci karo waqti ama meel badeecooyinka kale ee lagu soo saaro goobta. Dhammaan jikada la wadaago ma aha (ama ma noqon karaan) kuwa shati u leh habaynta hilibka.

Dukumintigani wuxuu bixiyaa macluumaadka ugu cusub waqtiga la daabacay, waxaana loogu talagalay inuu bixiyo hagitaan oo keliya. Akhristayaasha waa inay la xiriiraan AURI ama khabiir kale oo sharci si ay u helaan macluumaadka ugu dambeeyay marka ay dhammaystirayaan faahfaahinta calaamadda badeecad kasta.

Tixraacyada

1. www.mda.state.mn.us/food-feed/starting-meat-poultry-processing-business
2. www.fsis.usda.gov/sites/default/files/media_file/2021-02/Fed-Food-Inspect-Requirements.pdf
3. www.mda.state.mn.us/food-feed/wholesale-food-processormanufacturer-license
4. www2.minneapolis.gov/business-services/licenses-permits-inspections/business-licenses/food-restaurants/grocery-convenience-store/micro-food-wholesaler/
5. www.fsis.usda.gov/inspection/state-inspection-programs
6. www.mda.state.mn.us/food-feed/starting-meat-poultry-processing-business
7. www.fda.gov/food/guidance-regulation-food-and-dietary-supplements/hazard-analysis-critical-control-point-haccp
8. www.fsis.usda.gov/guidelines/2021-0014
9. www.fsis.usda.gov/guidelines/2021-0013
10. [HACCP Guidance | Food Safety and Inspection Service](https://www.fsis.usda.gov/food-safety-and-inspection-service)
11. www.mda.state.mn.us/sites/default/files/docs/2025-04/E2_Meat_Manual_4-2-25-WEB.pdf
12. www.mda.state.mn.us/sites/default/files/docs/2023-07/Shared-Kitchens-7.19.23.pdf

Maalgelinta tarjumaadda qoraalkan waxaa suurtageliyay heshiiska iskaashiga ee Resilient Food Systems Infrastructure ee ka socda Adeegga Suuq-geynta Beeraha (Agricultural Marketing Service) ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA). Nuxurka ku jira waxa si buuxda mas' uuliyaddiisa u leh qorayaasha, mana matalayaan aragtida rasmiga ah ee USDA.

